SOMALI

Infosheet 3. Admissibility

# KU OGOW XUQUUQDAADA

## WAREYSIGA AQBALAADA DADKA KA SOO JEEDA WADAMADA SOMALIA, SIIRIYA, AFGHANISTAN, BAKISTAN, BANGLADESH

LEGAL CENTRE LESVOS

**Ulajeedka xaashidsan waaa in lagu bixiyo macluumaad ku saabsan magangalyada ee soo timaada nidaamka soohdinta laga soo bilaabo July 2021.**

**Maahan mid dhameystiran waxay wajahaysaa is badalo waxaan kuula talinaynaa in aad la tashatid qareen Ruqsada shaqada qareenimo heesta loo ogal'yahay in gariiga ka dhax shaqeeyo ama hay’adaha bixiya taageerada dhanka sharciga ee biLaashka ah ka hor inta aad galin wareysiga si laguu diyaariyo aad u ogaatid qaabka uu udhacaayo Wareysiga**

Haddii aad magangalyo ka dalbatay Giriiga dhalashadaadu tahay mid ka mid ah **wadamada Soomaali Afghanistan, Siiriya, Bangladesh, Bakistan, marka koobaad waaa** **in aad gashid wareysi Ga ”aqbalitaanka” (wareysiga maxaa turkey ka soo waday)**

Tani waxay la micno tahay xafiiska mangaliyada ee girriga fiiri doona **in ay turki nabad kuu tahay adiga shaqsi ahaaneed** {marka loo fiiriyo in wadanka hooyo nabad kuu yahay }

Tani waxay ka dhagan tahay dowlada gariiga in qiimayn ku sameyn doonto hadii turkigu ku yahay wadan nabad ah aad ku noolaan kartid adiga shakhsi-ahaantaada magalyada caalamiga ka dalban kartid halkaas.

**<u>Fiiro gaar</u>** ah hadii ku diiwaan gashan tahay in aad ka timid mid ka mid wadamada soo sheegnay waa in aad soo gudbisaa wax walba oo cadeynayaya jinsiyadaada ama hadii aad tahay qof bilaa wadan ah waa Inaad u soo gudbisaa cadeymaha muujinaya in aad tahay qof bilaa wadan ah ugu danbeyn inta lagu guda'jiro waraysiga

Taas macneheedu waxa weeye in waraysigaagu inta badan lagu waydiin doono su'aalo ku saabsan noloshaada **iyo waayo-aragnimadaada Turkiga oo aan lagu waydiin doonin waddanka aad ka timid.** Ee somaliya, lkn lagu weydiin doono sida :

- Goorta iyo qaabka aad ku timid Turkiga (tusaale hadii diyaarad ku timid baasaboor iyo fisaha dalka ku galka Turkiga sidatay ama hadii aad safar dheer ku timid soo tahriibtay wadamo badan soo martay).

- Xagee kaga noolayd turkiga iyo imisa ayaad soo joogtay.
- Haddii aad wax dhibaato ah kala kulantay booliiska Turkiga, mas'uuliyiinta kale dowlada ka tirsan, ama dhibaato kala soo kulantay qofka aad u shaqeenaysay ama kooxo kale turkiga ka jira dhib kuu geestayn
- Haddii aad turkiga gudahiisa ka codsan kartay magangalyada caalamiga ah iyo haddii aad ka heshay magangelyo caalami ah ama aad heesatay iqaamad.

**Haddii ay jiraan sababo aadan shakhsi ahaan aadan ugu laaban karin Turkiga ama adiga shakhsi ahaan turkigu wadan amaan ah aad ku noolaan karto kuu ahayn, waa muhiim inaad si faahfaahsan u sharaxdo inta lagu jiro waraysigaaga.**

**1. Turkiga ma yahay wadan adiga amaan kuu ah aad ku noolaan karto ?**

Haddii ay jiraan sababo Turkey adiga shakhsi ahaan cadeynaya in turkiga kuu ahayn wadan amaaan ah , waa muhiim inaad si cad oo faahfaahsan u sharaxdo inta suurtogalka ah inta lagu jiro waraysigaaga, oo ay ku jiraan tusaale ahaan:

- Maxaa kugu dhacay inta Turkiga joogtay.
- Hadii aad dhibaato kala soo kulantay waa maxay sababta ay kugu dhacayn.
- Sababta aad ugu noqon la'dahay Turkiga iyo maxaa ka baqaysaa in ay kugu dhacaan hadii aad turkiga ku laabato.
- Sidee baqdintani ugu Xidhan tahay xaaladaada shaqsiyeed, iyo Sidee tani u saamaysay noloshaada iyo nabadgelyadaada.

**Sababaha** laga yaabo inaadan si nabad galyo ah ugu noolaan karin turkiga waxaa ka mid ah tusaale

- Haddii adiga shakhsi-ahaan aad kala soo kulantay dhibaato ama takoorid booliiska Turkiga ama maamulada kale ee Turkiga.
- Haddii hada ka hor laguugu xiray meel Turkiga ka mid ah
- Haddii aad halis ugu jirto in lagula dhaqmo si ka baxsan bani'aadamnimada, Iyo in lagu xiro ama jirdil ay kuu geystaan mas'uuliyiinta Turkiga.
- Hadii xiligii aad turkiga joogtay laga tarxiilay ama mas'uuliyiinta turkiga kugu qasbayn in aad wadan Kale ku laabato

- haddii lagaa hor istaagay inaad hesho daawayn ama daryeel caafimaad adigoo la ildarnaa xaalado caafimaad.

**FIIRO GAAR OO MUHIIM Ah.** Hadii aad heyso waraaqo iyo wax cadeymo ah muujinaya dhibaato caafimaad aad qabto  waa in soo bandhigtaa inta lagu guda'jiro wareysiga sdoo kale waa muhiim in aad si faahfaahsan u sharaxdo sida ay kugu suurtoobi waysay in aad hesho daryeel caafimaad xiligii aad turkiga joogtay

- Haddii lagugu qasbay inaad shaqeyso adigoon wax mushaar lagu siineynin ama lagugu qasbay in aad ku shaqeyso lacag aad u yar aan u qalmin shaqada aad qabanaysay
- Haddii qof kugu khasbay inaad timaaddo Turkiga ama Giriiga, si uu xorriyaddaada ugu faa'iidaysto
- Hadii aad dalka Turkiga kala soo kulantay khatar iyo tacadiyo ay kuula kaceen dad ama kooxo ku faanaya awooda dowlada Turkiga  aan lagula xisaabtami karin booliska iyo cadaalada Turkiga.
- Haddii aad khatar ugu jirto in lagugu qasbo guur aadan raali ka ahayn hadii aad Turkey ku laabato ama xiligii aad soo joogtay Turkiga laguugu qasbay guur,
- Hadii caruurturtaada laga hor  istaagay inay waxbarasho ka helaan Turkiga.

Waxa kale oo aad muhiim u ah inaad si faahfaahsan u sharaxdo sababta aadan ugu laaban karin Turkiga ay ugu xidhan tahay xaaladaada shakhsi ahaaneed ama aqoonsigaaga, tusaale ahaan:

- **Sinjiyadaada ama qowmiyada ka soojeedo**: sababtoo ah midabkaaga maqaarka ee madow ah ama sababtoo ah waxaad tahay qayb ka mid ah qowmiyada laga tirada badan yahay ee Turkiga (tusaale Carab, Afgaanistaan, Hazara, Koonfurta Aasiya, Yazidi, Kurdish, Baloch, Afrikaan madow, iwm.
- **Diintaada:** Sababta oo ah diinta aad ku dhaqmeysid lagama Ogolo gudaha dalka Turkiga, maxaa yeelay goobtaada cibaadada ayaa la bartilmaameedsaday, ama adiga iyo kuwa kale kugu diinta ah waxaad la kulmaysaan rabshado iyo cadaadis iwm

- **Jinsiyadaada** : sababtoo ah waxaa ka ka soo jeedaa wadamada Soomaaliya syria Afghanistan bakistan Bangladesh Kurdish ama waxaa tahay qof bilaaa wadan ah
- **Fikradahaaga siyaasadeed:** Waxaad qabtaa fikrado ka duwan dawladda Turkiga oo aad si cad ugu soo bandhigtay baraha bulshada, waxaad ku firfircoon tahay dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed, waxaad ka qeybqaadatay mudaaharaad, ama waxaa tahay qof bulshada Turkiga yaqaanaan oo caan ah, iwm.
- **Kooxda aad ka tirsan :** (sababtoo ah waxaa tahay qof bulshada ka jinsi duwan xaga galmada waxaa tahay(gay lesbian), ama sababtoo waxaa tahay qof dumar ah . Waxaa tahay trans, ama sababtoo ah ma garaneysid rag iyo dumar waxa aad tahay ama shaqadaadaTurkey waxay ahayd (saxafi ama wariye, macalin (barre), ama Waxaa la shaqeynaysay hay’ado NGO iWM.).

## 2. Magan galyo maka heshay Turkiga ?

Intii aad Turkiga joogtay waxaa isku day'day in magangalyo dalbato ama kaarka dagnaashaha("kimlik") si ay naftaada u xasisho lkn laguuma ogolaan taas badalkeeda waa lagu diidey **waaa inaad si faahfaahsan u sharaxdaa sababta laguugu diidey magangalyada ama dagnaashaha, tusaale sababtoo ah:**

- Sababtoo ah mas'uuliyiinta Turkiga kuma diiwaan galin inkastoo adiga aad codsatay

- Maamulka Turkiga waligood kuma siinin wax dukumiinta ah in kastoo aad diiwaan gashanayd

**Haddii aadan isku dayin inaad magangelyo ama degenaansho ka raadsato Turkiga, waa muhiim inaad sidoo kale sharaxdo sababta inta lagu jiro wareysigaaga:** tusaale sababtoo ah:

- Wax badan ma aadan soo joogin turkiga

- Si xurnimo leh uma kala socdaali karin gudaha Turkiga

- Ma dareemaynin nabad galyo in aan iska diiwaan galiso maamulka turkiga (laga yaabo mid ka ah sababah  kor ku xusan

## 3. Turkiga maku leedahay wax xidhiidh?
## (asxaab iyo qaraabo maku leedahay Turkiga)

Int uu socdo wareysiga ogolaanshaha, magangalyada Giriiga ayaa sidoo kale la qiimeyn doona haddii ay jiraan

**Hadii aad Turkiga ku leeedahay wax xadhiidh waxaa laguu tixgalinayaa in aad si nabad ah ugu noolaan karto halkaas**

**<u>Hadii aad joogto giriiga in ka badan hal sano wax xidhidha lama lihid</u>**

- Waxaa laga yaabaa inay u arkaan in aadan wax xidhiidh ah ku lahayn
- Hadii ay tahay markii kugu horeesay aad timid Turkiga
- Hadii ulajeedka safarkaaga  uusan ahayn mid ku ekaa turkiga
- Hadii aadan awood u yeelan wayday in nolal maalmeydkaaga ka soo saarato Turkiga  ama si xuriyad ah ku socdaasho gudaha Turkiga
- Hadii  iqaamada turkiga aadan lahayn ama kaarka  qaxootiga “kimlik ‟
- Hadii aadan ku yeelan turkiga aqal aad ku hooyato
- Hadii turkiga aadan ku lahayn wax ehel qaraabo iyo asxaab ah ama xariir xirfadeed

**Hadii aadan turkiga wax xadhiidh ah ku lahayn dhab ahaantii waa muhiim in aad sharaxaad ka bixiso inta lagu guda’jiro wareysiga**

Si aad wax badan ugu ogaato xuquuqahaaga iyo waajibaadkaaga inta lagu jiro waraysiyada aad la yeelanayso hay'ada magangalyada Giriiga, akhri waraaqda **OGOW XUQUUQDAADA -WAREYSIGA MAGANGALY ADA DHEXDIISA.**

## Wareysigaaga kadib:

- **Haddii kiiskaaga la aqbalo** (Wareysiga Turkey maxaa ka soo wadey ), hay'ada magangalyada Griiga ayaa kugu wargalin doona talaabooyinka xiga iyo taariikhda wareysigaaga xiga (wareysiga magangalyada /wareysiga maxaasomali kaa soo wadey )

Waxaan kugula talineynaa inaad sidoo kale la tashato qareen ama hay'adaha bixiya taageerada xaga sharciga ah si aad u diyaargarowdo wareysigaaga magangalyo. sidoo kale aqri xaashida **macluumaadka OGOW XUQUUQDAADA - YAA HELI KARA OO XAQ U LEH MAGAN GALYADA CAALAMIGA AH?**

- **Hadii wareysigaaga Turkiga** la aqbali waayo diidmo lagu siiyo waxaad ka qaadan kartaa racfaan waxaad xaq u leedahay in aad la kulanto qareen lacag la'aan ah oo dowlada ka socda si bilaash kugu shaqeeya

Xilliga kama dambeysta ah ee rafcaanka waa waqti gaaban (10 maalmood laga bilaabo daqiiqada laguu soo sheegay diidmadaada). Waxaan kugula talineynaa inaad la tashatid qareen sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah oo aad weydiisato sharaxaad diidmadaada kuuna tarjumo waraaqha diidmada .sidoo **OGOW XUQUUQDAADA KADIB MARKII DIIDMO LAGU SIIYO (rejection).**

**WhatsApp:** +30 694 961 8883
**Landline:** +30 225 1040 665
**Iimaylka:** info@legalcentrelesvos.org
**Facebook:** www.facebook.com/LesvosLegal
**Cinwaanka xafiiska:** Komninaki 20, Mytilene 81100
**Saacadaha shaqada :** Isniinta ilaa Jimcaha - 10 subaxnimo ilaa 2 galabnimo